

XEER L. 65 rep.

**MAAMULKA WALAAYADA EE SOOMAALIYA
MAAREEYUHU**

MARKII UU ARKAY xeer 4 novembar 1951, n. 1301, kaas oo xeerinaya ilaalinta heshiiska dulka soomaliya ee Talyaanigu maamulo siinayana fulin buuxda,

MARKII UU ARKAY xeer n. 47 ee 22 luulyo, oo la xiriira nadaamka ku meelgaarka ahaa ee maamulka talyaaniga ee loo aaminay Maamulidda Soomaaliya;

MARKUU OGAADAY macluumaadka Maamulka. luulyo 28, 1950, n. 50 oo u wakiishay madaxa Xafiisyada Dhexe ee maamulka Soomaaliya ee Talyaaniga siiyana xoogaa oggolaansho ah oo xagga kharashka ah iyo saxeexa ogolaanshaha qaarkood;

MARKU QIIMEYEY horumarka sii kordhaya ee dhanka caafimaadka degaanka arkayna in loo baahan yahay in la sameeyo Xafiis u gaar ah;

MARKUU QIIMEEYEEY isagoo sii tixraacaya in horumarinta dhaqanka iyo dugsiyada degaannada ay leeyihiin muhimad mawrwalba sii kordhaysa iyo sida inay ku habboon tahay in la sameeyo xafiis u gaara;

MARKUU QIIMEEYEEY tixgaliyana baahida loo qabo in la baabi'yo Xafiiska Caafimaadka iyo wacyigelinta dadweynaha ee lagu aasaasay amarkii hore loo soo tilmaamay ee 22 Luulyo 1950;

WAXA LAGAMA MAARMAAN loo arkay in maamulka lagu ballariyo madaxda xafiisyada kor ku xusan loona ogolaado in ay khrashaad yar yar bixi karaan ayna saxiixi karaan waxyaabaha qaar.

WUXUU XEEREYAY

Qod. 1

Laga billaabo 15 april 1952 waxa la baabi'yey xafiiska caafimaadka iyo wacyigelinta dadweynaha.

Qod. 2

Laga billabo isla taariikhdaas waxaa la asaasay xafiisyada soo socda:

- a) Xafiiska Caafimaadka;
- b) Xafiiska Wacyigelinta Dadweynaha.

Qod. 3

Madaxda xafiisyada ee qodobka hore lagu soo xusay waxaa loo wakiishay oggolaanshaha lagu tilmaamay amarka D. A. soona baxay 28 luuliyo 1950.

Muqdisho, 23 apriile 1952.

p. MAAREEYE
Canino